Hogaanka Xornimada lagu helo iskutallaabta

Waxaa diyaariyey Charles R. Solomon, Ed.D.

Intaad sii akhrisaneysid qoraalkan, waxaa suurtagal ah inaad dhib weyn ku jirtid. Waa suurtagal inuu baniaadmiga kuu gefay waxayna kuula egtahay inuu Ilaah aad kaaga fog yahay oo ay macaawinadiisa ku soo gaari Karin. Waxaa suurtagal ah inaad ku soo kortay marxalad aad ka dareentay inaanad helin xanaano jacayl oo aad ku heshay wax alla waxaad u baahneyd. Waa suurtagal inaad fahantay inuu sheyga ugu weyn e aad la'dahay uu yahahy nabad. Waa suurtagal inaad la yaaban tahay sababta ay nabadarro uga jirto wadamada ay dadka isku diin iyo isku luuqadda yihiin. Haddaba nabadda dhabta ah intee laga hela? Sidee lagu hela nabadda? Waxaa suurtagal ah inaadan weliga Ilaah ku mahadinin siduu kuu uumay iyo wanaagga uu kugu deeqay.

Marxaladda ebernimada e uu qofka dareemo la qabsashadeeda waxay barbar soconeysa welwel yar ilaa uu qofka ka gaaro heer uu ku raboonayo inuu nafta iska bixiyo. Arintan awgeed, xidhiidhka aad la leedahay kuwa aad jaceyshahay wuxuu ku dhowyahay burbur – amaba waxaa suurtagal ah inuu burburayba oo wax laga qaban karo jirin. Haddii aad ku jirtid xaalad welwel kugu bilabeysa ama niyad jab, haddaba farriintan adigaa laguugu talagalay.

Ilaah aad buu kuu jeclaaday oo kuu soo diray Qof – Wiilkiisa, Rabbiga Ciise Masiix – si uu iskutallaabta ugu dhinto dembiyadaada, si uu mar kale nolosha dib ugu soo celiyo si uu baniaadmiga Isaga ugu helo wax alla wixii nolosha dhan looga baahan yahay oo dhan. Maanta laba mid unbay kuu tahay adiga waxaad aaminsantahay inay dhimashada Ciise fulisay kutalagalka uu Ilaah lahaa e ah inuu dembiyadaada kuu cafiyo ama ahaynba inaad saa u aaminsaneyn. Haddii aad aaminsaneyn, farriintan sahlan, iyo sawirka lagu macneynayo, waa suurtagal inay noloshaada bedesho intaad noloshiisa ku soo dhaweyneysid Isaga – Nolosha Rabbi Ciise Masiix.

Waxaa suurtagal ah inaad Masiixa ku aamintay badbaadadaada oo aad rafaadsan tahay laakiin hadda tahay qof Ciise rumeysan e ay weli u dhimmantahay inuu ku guuleysto nolosha Masiixinimada. Haddii ay marxaladahan qaarkood yihiin kuwa aad isku tilmaami kartid, fadlan wax barashadan laguu soo jeedinayo toos u raac adigoo Baybalka akhrisaneysid oo ku duceysaneysid inuu Ilaah kuu muujiyo runta oo dhan e ku jirta casharkan.

Ujeeddadaada

Garaangarga hoos ku sawiran wuxuu muujinaya inuu qofka baniaadmiga ah ka tirsan yahay saddex qaybood sida ruuxa, qalbiga iyo jirka (1 Tesaloniika 5:23). Dareenka jirka ayaa naga dhigaya inaan wax kastoo agagaarkeena ah ama ku yaalo xidhiidh la lahaano. Qalbiga, ama dabiicadda, waxaa ka tirsan waxyaalaha uu maankeena ku mushquulo, doonisteena iyo camaladeena. Qalbiga wuxuu naga dhigaya kuwa xidhiidh wada leh. Ruuxa wuxuu nagu caawinaya inaan ka sara marno awooddeena, xaddadkeena iyo

dhacdooyinka inta aan sii barbaareyno ama nala cusbooneysinay oo waxaa nagu dhex shaqaynaya Ruuxa Quduuska ah.



Ruuxa wuxuu la xidhiidhsan yayahay Aadan – Qoyska sheeddaanka (eeg sawirka hoos ku yaala) ama ahayn wuxuu la xidhiidhsan yahay Masiixa, qoyska Ilaah. Waxaan adduunka ku imaneyna annagoo ah kuwa ka soo farcameen Aadan oo wadana aslinimadiisa. Taasi waxay ka macna tahay inuu ruuxeena ka dhintay Ilaah uu ku noolyahay Sheeddaanka. Waxaan ka tirsanahay qoys aan sax ahayn! Madaama ay nolosheena ka soo farcantay aabbihii hore, Aadan, oo aan isaga kula xidhiidhsanahay silsilad aan go'eynin, runtii isagaan ku xidhiidhsaneyn markuu dembaabayey. Sababtaas awgeed, waxaan dembiilayaal ahaanay ka hore intaanan dhalaninba. Madaama ay xaladdu sidaa tahayna markaan dembaabeyno waxaan sameyneyno waa wax caadi ah oo nagu jira ama aan ku dhalanay (Rooma 3:23). Nolol kastoo ku sii jirta nolosha Aadan waxay ku dambeyn doontaa Naarta, isla sida noogala tusay sawirka (Rooma 6:23). In kastoo aan ku noolnahay nolol aad u wanaagsan, markaan baniaadmi ahaan u hadalno, waan ka soocannahay Ilaah ilaa aan Isaga xidhiidh kula yeelano Qoyskiisa taasi oo aan ku ahaaneyno inaan xagga Ruuxa ka dhalano.

Waxyaalaha aad u baahantahay

Erayga "badbaado" (1) sida ay ugu dhigantahay Sawirka Garaangarta micnaheedu wuxuu yahay inay jirto isbedel ama ka dhallashada ruuxa. Tani waa sida keliya e aan kaga talaabsan karno nolosha Aadan oo aan ku dhallan karno nolosha Masiixa, taasi oo ah nolol weligeed ah, isla sida loogu sharaxay Sawirka Leenka (Yooxanaa 3:3). Si aan uga leexano nolosheeni hore ama aan dib u dhallano, waa inaan fahanno ama aan qirano inaan nolol aan sax ahayn ku noolnahay oo aan dembiilayaalnimo ku dhalanay, taasi oo natiijadeeda ahaatay inaan si ka hor tag la'aan ah ku dembaabno. Dabadeedna waa inaan Masiixa ku soo dhaweyno nolosheena maxaa yeelay wuxuu u dhintay dembiyadeena.

Markaad noloshaada ka bedeleysid xagga qalbiga ama aad mar labaad dhalaneysid, kuwa nolosha Ruuxa e Masiixa ku so dhaweyaan ruuxyadooda, xagga iimaanka ayey Ciise kala midobayan (1 Kor 6:17). Haddii ay tahay inay ka guuleystaan jarrabaadda ay la kulmayan oo ay tahay inay nabadda Ilaah noloshoda ka daremaan, saa ay tahayna, weli arintu ma idlo haddii ay hubin iney helaan badbaadada. Xaqiiqda (2) waa inay ahaato mid ku saleysan Eray aan bedelmeynin e Ilaah e dhabta ah haddii kale xaqiiqdaasi aan salkeeda Erayga Ilaah ahayn waxay ahaaneysa mid layska sameystay.

Kuwa badan oo fahansan (xagga qalbigooda) oo hubaan shaqsi ahaan inay Ciise Masiix rumeysteen oo aamineen, laakiin ilaa hadda ma haystan xaqiiqda xidhiidhka ay Ciise la leeyihiin maxaa yeelay ma hubaan badbaadadooda. Badana waxyaalahan waxaa sababayan waxyaala badan oo dhibka aasaas u ahaa ilaa iyo ka bilabato wakhtigii carruurta la ahaa sida cunugga oo yaraantiisi aan helin jacaylka waalideed ama walaalo. Taasna waxay keentay inuu qofka ku nolaado nolol aan sax ahayn. Waxyaalaha uu qofka dareemo ama maskaqda ku hayo ma ahan inay yihiin kuwa la xidhiidhsan dhabta jirta,

ma ahan kuwa waafaqsan sida ku dhigan Baybalka amaba sida uu anshaxa nolol maalmeydkeena adduunka gacan siinayo. Aad bey ugu dhawdahay inay sida aan dareensan nahay inay wax kasta ahadaan way ka duwan yihiin sida ay dhabti wax yihiin ilaa uu Masiixa na baro waddadadiisa xaqa ah uu naga dadiifiyo waxyaalaha qaldan e qalbigeena ku jira ama aan maankeena iska dhaadhicinay.

Qofka Ciise rumeysan, hadduu mar dhaw rumeystay iyo hadduu mar hore rumeystayba waa inuu hela xaqiiqda ah in xidhiidh dhab ah oo laysku haleyn karo laga helayo rumeysadkaasi. Waa inaan fahanno inaan heleyno xidhiidh weligiis jira oo aan la bilabeyno Ilaah kaasi oo aan ku heleyno Ciise Masiix (Yooxanaa 5:24). Xidhiidhkan waa in la ogaado inuu yahay mid laysku aamini karo oo hoy laga dhigan karo (3). In kastoo ay kuwa badan oo rumeysan ay fahansan yihiin inay Masiixa qateen, kuwa tiro yar ayaa qumaati u fahansan inuu Ciisena iyaga ogoladay oo ogolaansho mid tooda la mid ah ku soo dhoweynayo. Kuwa tiro badan oo iyaga ka tirsan ogolaanshadooda ay Ciise ogoladeen waa mid ay ku qasabtay daruufta xidhiidhka ay baniaadmiga la leeyihiin oo waxay daremeen inay iyaguna u baahan yihiin inay tixgeliyan soo dhoweynta Ilaah (4), in kastoo durbaba iyaga lagu ogoladay xidhiidhka ay noloshooda Ciise kula leeyihiin (Efesos 1:6). Qof kastoo Masiixi ah waa la soo dhoweynaya, laakiin kuwa badan ma aaminsano ogolaanshaha iyo soo dhoweyntaasi, ama xaqnimadaasi (2 Kor 5:21), taasi oo ku imaneysa iimaan.

Kuwa kaloo tiro yarna, waa kuwa aad isku dhiibayan (5) amaba noloshooda si buuxda Ciise Masiix ugu adeegayaan. Kani waa go'aan aan dib looga noqon Karin taasi oo aan Ilaah ugu ogolaneyno inuu wax alla wuxuu rabo ku sameyo nolosheena ama inuu istecmaalo nolosheena si aan dadka kale ugu adeegno una gaarsino Eraygiisa. Xaquuqdeena oo dhan ayaan Isaga ugu adegeyna.

Inta badan dhacdooyinka aan nolosha kala kulanno ayaa na wareerinayan markaan go'aanka noocan ah gaarno, maxaa yeelay Ilaah wuu ixtiramaya codsigeena ah inuu nolosheena oo dhan siduu doono ku istecmaalo. Haddii ay tahay inuu Ilaah toos noo hogaamiyo, waa inaan habka aan isku hogaamineyno oo dhan ka soo leexano oo Isagu hogaanka la wareego. Yaanan ilowbin taasi waa isbedel aan farxad guud kaga heleynin adduunka! Marxaladooyinka ama dadka uu Ilaah istecmaalayo si aan isbedelkaasi ugu ficilqaadno inta badan naftooda ma ahan kuwa si caadi ah looga fahmi karo ilaahnimo ama lagama arkayo ruuxa Ilaah. Maraha qaarkood waxay noo keeni karaan dhibatooyin iyo jaho wareer aan istaahilin, laakiin waa uun silica noocaas ah kuwa aan ku fulineyno danta uu Ilaah ka leeyahay nolosheena (I Butros 2:20-2 1; Filiboy 1:23-30). Isla marka aan silceyno ama nala edbinayo (Filiboy 3:10; Cibraaniyada 12:11), ma ahan marxalad aan farxad ka dareemi karno, laakiin waa qaxarkaasi aan mareyno kan ay natiijadiisa tahay quduusnimada aan u riyaaqeyno.

Danta uu Ilaah kuwa Ciise rumeysan ka leeyahay waa inay dhamaantood ahadaan kuwa noloshooda lagu tilmaami karo (Rooma 8:29). Isbedelka nocaas ahna wuxuu ku imanaya oo keliya silcid. Marka la leeyahay "Wax waliba" sida ku dhigan Romans 8:28 taasi oo kutalagalkeeda dhamaan tahay wanaag inta badan sawirada aan toos u aragno ma ahan kuwa wanaag uu ka muuqdo oo aan ka ahayn niyadjab.

Waxyaalaha aad qalbigaaga kala xarbineysid

Xarafta "Q" e ku dhigan dhex bartanka garaangarka kor ku sawiran waxay u dhigan tahay “Qof” taasi oo ah nafsadda iskeda u tashato ama qancinta doonista jirka. Jirka aad buu isugu deyaya inuu hogaamiyo nolosha kuwa badan e Masixiinta ah inta ay adduunka ku noolyihiin. Habab kala duwan ayuu dadka ku hogaamiya taasi oo ku xiran shaqsiga, si uu doonistiisa ugu fushado waxa uu ka daneysanayo ama qofka taasi oo xumaati ahaan karto ama wanaagba. Lacagta, hormarka, waxyaalaha adduunka looga baahan yahay, caannimada, galma jacaylka, qofka oo jacayl inuu hogaamiye noqdo, ama waxyaalaha kale e badan e halkan lagu sheegi Karin ayaa damiirka qofka hogaamin karan markuu qofka iisu dhiibo hogaanka nafsaddiisa – taasna waxaa lagu macnayn kara nafsadda aan Ilaah horseed ka dhiganeynin. Sidaa awgeed, “jirka” waa doonista qofka masiixiga ah e go’aansaday inuu ku noolaado sida uu ku guto awooddiisa.

“Jirka”, haddaba, waa dhibato midda ugu weyn e haysato kuwa Masiixa raacsan – waa dhib lala barbardhigi karo sanam caabudid. Maxaa yeelay mar alla markaan bartamihii uu Ciise hogaanka kula wareegi lahaa aan waxyaala kale bartamahaasi gelino – xataa annaga nafteena wax alla waxaan carshiga saarano ayaa noo ahanayaan sanam. Ilaah waa inuu si heer sare ah nooga baabi’iyo hogaanka jirka. Wuuna baabi’in karaya, wuxuuna saa ku yelaya Isagoo noo muujinayo in nolosha damaca jirka lagu hogaamiyo ay tahay mid laciif ah oo aan guul lagu gareynin, qofka masiixiga ahna markuu arko guuldarrodaasi, wuu iska inkiraya hogaankaasi oo wuxuu noqonaya mid jacleysta inuu noloshaasi ku bedelo mid uu Masiixa bartamaha hogaanka u fadhiyo.

Marba hadduu jirka hogaaminayo nolosha qofka, “nafta” (dabiicadda) ma ahaneyso xarbi la’aan sida loogu muujiyey qayb ka tirsan garaangarta kor ku sawiran waxayna ahaneysa mid joogta ah. Inta da’da ay sii weynaneyso oo masuuliyadda na saaranna ay sii balaraneyso, xarbiganna wuu sii weynanaya. Badanaa waxaa dhacda inay maskaxda xagga saykolojiga xarbiga nafta kaga maamusho muddo dheer inta uu qofka noolyahay, laakiin natiijada ma ahaneyso mid qalbiga qancisa.

Markay qofka isugu key darsamaan maskaxda oo aan xagga Saykolojiyada ka deganeyn iyo dareenka uu qofka daremayo inuu dembiile yahay (wixii dhab ah iyo wixii layska dhaadhiciyeyba) waxay nolosha qofka Ilaah la’aan iisu hogaamiya ku dhalineysa deganaansho la’aan. Deganaansho la’aanta waa in falkeeda la galo oo xal loo helo. Dadka qaarkiis waxay xalkaasi ka dhiganayan inay dadka kale ku ciil baxaan iyagoo si cad u fereynaya ama hadal ku daldalmayan, dadka qaarkiisna waxay ka cabsanayaan in laga aarsado oo waxay ku dadaalayan inay dhibaatadooda la aamusayan. Qaar kalena deganaansho la’aantooda iyo xanaaqooda way dedayan maxaa yeelay dhibatooyinka iyo deganaansho la’aan iyo xanaaqa haysto iyagaa dusha iska saaraya. Markii deganaansho la’aanta iyo cadawtinimada la qarsado, sabab kastoo loo qarinayaba, waxay natiijadooda ku soo bixi doonta xagga dareenka qofka ama maskaxda haddii kale labaduba way ka muuqan doontaa. Dadka qaarkiis waxuu istecmalaya maankiisa oo ku fulin kara waxyaala badan oo burbur ah ama xaqiraadda dhab jirta. Taasi waxay iyaga awood ku siineysa inay iska indha tiraan wax ka qabashada dhabta jirta, nolosha ay teeda u caddahay e aan Ilaah ixtirameynin.

Markuu xarbiga saykolojinimada mudda dheer ku jiro qofka, wuxuu iisu bedelaya gunuunac iyo calaancal aan macna lahayn isla sida ay uga muuqato sawirka. Cudurada la arki karo in kastoo ay dhab yihiin, runtii waa calamooyinka ama natiijada dhibatooyinka uu qofka kala xarbinayo xagga saykolojiyada e qofka naftiisa isku hogaaminayo. Waana isla sida dhibatooyinka saykolojiyada e lagu tilmaami karo xagga maanka.

Fakiskaada

Calamooyinkan muuqaalka ah iyo kuwa xagga saykolojiyada ahba waxay bilabayan inay baaba'aan isla marka uu qofka fahmo sida uu Ilaah u cirib tiri karo aasaaska dhibatooyinka. Wuxuuna Ilaah sidaa ku sameynaya waa baabi'inta uu baabi'inayo qofka nafsaddiisa isku filan oo qofka ku abuurayo inuu ahaado mid Ilaah u ogolado inuu noloshiisa oo dhan hogaamiyo.

Sawirka Leenka e hoos ku sawiran wuxuu muujinaya "nolol ka badbaadsan dhimasho" muhimadda ugu weyn e ku jirta ayaa waxay tahay habka keliya e xarbiga qalbiga lagu xalin karo inay tahay habka Ilaah. Leenka dadban wuxuu ishaara u yahay nolosha weligeed jirta, taasi oo ah nolosha Masiixa. Macnayn ahaan taasi waxaa lagu fasiri kara inay nolosha weligeed ah tahay mid aan aasaas iyo dhamaad toona lahayn. Wey ka sara weyntahay xuduudka wakhtiga. Madaama uu Masiixa Ilaah yahay, weligiis wuu jiray wuuna jiri doonaa. Noloshiisa waa isla tii shallay, maanta iyo weligeedba (Cibraaniyada 13:8). Sida lagu muujiyey bidixda leenka, Masiixa wuxuu ku bedelmay "jir" (Yooxanaa 1:14) oo wuxuu heerkaas ku nolaa mudda 33 sanno ah. Dabadeedna waa la qodbay, la aasay oo maalinta saddexaad ayaa dhimashada laga soo sara kiciyey (1 Kor 15:3-4). Maantadan wuu noolyahay (Cibraaniyada 7:25). Haddaba xusuuso inay nolosha weligeed ah ahayn oo keliya mid maanta ama mustaqbalka jirta e waa mid taabaneysa xataa nolosha weligeed jireysa e la soo dhaafay.



Ilaa aan qumaati Ilaah nolosheena u dhibeyno ama aan mar labaad dhallaneyno (Yooxanaa 3:3) weli kama tirsanin nolosha weligeed ah e Masiixa weligiis nool e waxaan ka tirsannahay nolosha dhimashada leh e Aadan. Qof kasta way u caddahay in haddii uu mid ka mid ah awowayasheeni hore ka maqanyahay leenka dadban e bidixda kore ka soo hoobanayo e u hoobanayo midigta hoose, annaguna waxaan ahaan lahayn kuwa aan jirin. Waxaa cad inay nolosheena askunkeeda ahaa Aadan, sababtaas awgeed wax alla wixii isaga ku dheceen annaguna way nagu dheceen. Markuu dembaabay, annaguna waan dembaabnay. Markuu xagga xidhiidhka uu Ilaah la lahaa ka go'ay ama uu xagga ruuxa ka dhintay, waan dhimanay isla sida isla sida aan u dhiman lahayn sida uu u dhintay awowgeeni hore hadduu dhiman lahaa intuusan wax ilma ah helin. Haddaba, madaama ay dhimashada ruuxiga ah tahay mid laga go'ayo xidhiidhka Ilaah lala leeyahay, dhammaanteenba waxaan nagula dhalay meydnimo. Waxaan u baahannahay cafin nagala tirtirayo, saa ay tahayna nololna waan u baahannahay. Rabbigeena Ciise masiix wuxuu u yimid inuu na siiyo labadaas (cafiska dembigeena iyo nolosha weligeed ah) iyo weliba inuu na siiyo nolosha sara kaca (Yooxanaa 10:10).

Haddii aad qof masiixa rumeysan oo addeecsan tahay, waxyaalahan kuguma cusbo. Waxa aadan weli fahansaneyn waa kuwan; qofka Ciise rumeysan dhimashada caadiga ah e la naf go'ayo waxay u tahay iridda lagaga gudbayo nolosha adduunka iyo dembiga oo lagu gelayo nolosha jannada iyo Ilaah oo nolosha oo dhan lala noolaan doono. Mid taa la mid ahna waxay tahay inay jirto nooc kaloo dhimasho ah taasi oo ah albaabka lagaga gudbayo nolosha dembiga lahayd e Aadan e lagu gelayo nolosha weligeed ah e Ciise Masiix taasi uu qofka helayo markuu "mar labaad dhasho," Wuxuu ku dhalanaya nolosha Masiixa oo isla markaana wuxuu ka dhimanaya noloshii Aadan.

Masiixa wuxuu hogaanka nolosheena qabanaya markaan Isaga rumeysano oo aan nolosheeni hore ka dhimaneyno oo aan tiisa dib ugu dhalaneyno mar kale, laakiin taasi ma ahan ujeeddada oo dhan. Waxaa haddana nagala dhigaya kuwa Isaga kala qayb qaata nolosha weligeed ah . Rooma 6:3 waxay leedahay, "Mise ma waydaan ogayn in kulli inteenna lagu baabtiisay Ciise Masiix dhexdiisa, lagu dhex baabtiisay dimashadiisa?" Haddaba nagulama biyo gelinayo noloshiisa oo keliya e xataa dhimashadiisa ayaan kala qayb qaadaneyna. Laba nolol oo kala duwan (noloshii hore e Aadan iyo nolosha cusub e Masiixa) kuma wada noolaan karno hal mar.

Dabiicadahaaga

Markaan Ciise Iimaan ku qaadaneyno, taasi waxay caddeyneysa in dhimashada uu iskutallaabta ku dhintay ay naga nadiifineyso dembiyadeena. Saa ay tahayna, waxyaala kale ayey macna u tahay. Waxay caddeyneysa inaan geleyno nolol cusub taasi oo ah mid dib u taabaneyso noloshii hore e laga soo gudbay iyo weliba nolosha dambe. Haddii aan si kale u sharaxno, taarikhdeeni aan ku helnay Aadan – xumaan iyo wanaagba – waxaan ku bedeleneyna taarikhda weligeed jireysa e Masiixa. Waxaan dhaxleyna "abtirsi cusub!" madaama aan ahaanay kuwa ka qaybqaadanayaan nolosha Masiixa, waxaan sii ahaneyna kuwa weliba Isaga kala qayb qadanayaan dhimashadiisa, aasiddiisa, sara kiciisa iyo aadidda samada oo aan la fadhiisano xagga samyoonkinga (Rooma 6:3-6, Galatiya 2:20; Efesos 2:6). Isagu wuxuu leeyahay hal nolol oo keliya taasna waa tan aan ku heleyno dhallashada cusub (1 Yooxanaa 5:11-12).

Ilaa aan ku fahanno iimaanka aan leenahay shaqsi ahaan e waayaaragnimo u leenahay in nalala qodbay Masiixa, waan ku dadaleyna inaan isku deyno inaan u noolano Masiixa. Xarbiga qalbiga e ka soo askunmay xiriirka taarikhda ah e aan la leenahay Aadan weligiisba wuu nala xarbinaya iskuna deyaya inuu naga guuleysto. Laakiin markaan iimaan dhab ah ku aamino kuna addeecno xiriirka aan Masiixa kula lahaanay dhimashada uu iskutallaabta ku dhintay iyo sara kaciisa, waa markaasi oo keliya markaan awood u leenahay inaan dhab ahaan ku dhaqano sida qoran, "sidii Masiixa kuwii dhintay loogaga sara kiciyey ammaanta Aabbaha, aan innaguna sidaas oo kale cusaybka nolosha ku dhex soconno" (Rooma 6:4t) waana markaan odhan karno sida qoran, "Sidaas daraaddeed haddii qof Masiix ku jiro waa abuur cusub, oo waxyaalihii hore way idlaadeen, bal eega, wax waliba way cusboonaadeen e" (2 Kor 5:17).

Fahanka iskutallaabta loo leeyahay (inaan fahanno sida noolala qodbay Masiixa ulana sara kacnay Isaga) waa albaabka lagu gelayo nolosha Ruuxa Quduuska ah e Ilaah hogaaminayo sida ku dhigan Galatiya 5:16. Waa nolol lagu helay dhimasho, guul lagu

helay guul darro – waana danta guud e ku jirta ahna jawaabta sababta silaca ku jira nolosha qofka Masiixa rumeysan. Waddada aan ku gareyno iskutallaabta iyo iskutallaabta nafteeda, waa waddo lagu silcayo, saa ay tahayna waa habka keliya e lagu gaarayo dhamaadka silcidda.

Miyaad ka daashay xarbiga aad waxyaala badan qalbiga kala xarbineysid? Miyaad ka daashay guuldarroda joogtada ah oo aad rabtid inaad kaga guuleysatid iimaan? Miyaad diyaar u tahay inaad ka dhimatid waxyaalaha dabiiciga kuu ah oo dhan si aad ugu nolaatid nolosha buuxda e Ciise kula rabo? Markaad saa sameyneysid waxaad noloshaadi baniaadminimo ku bedeleysa mid uu Ciise Masiix hogaaminayo oo waxaa kaa buuxsamaya ama toos kuu hogaaminaya Ruuxa Quduuska ah. Haddii aad diido inaad isbedelkan sameysid, waxaad diyaar u tahay inaad nolosha dembiga leh ku sii socoto oo Ruuxa Quduuska ah ayaad kaga xanaajineysa xarbiga qalbigaaga, silaca aad silceysid iyo guuldarroda aad ku jirto.

Ducada Badbaadada

Haddii aad ka daashay silaca aad kala kulmeysid markaad noloshaada ku hogaamiso awooddaada, Masiixa wuu ku badbaadinaya haddii aad hogaanka noloshaada u xilsaartid. Haddii aad weligaa Ciise u ogolaanin inuu ahaado Badbaadiyaha noloshaada tallaabada ugu horeysa e aad qadeysa ayaa waxay tahay inaad Ilaah u ogolatid inuu uun cusub kaa dhigo. Taasna waxay ku ahaneysa Ilaah oo ku siinayo dhalasho cusub e xagga ruuxa ah ama inaad Isaga la bilowdid xiriir cusub. Xiriirkan cusub ama dib u dhalashadan waxaad ku heleysa ducadan markaan ku duceysato:

"Aabbahayaga Jannada ku jirrow, Waan fahmay inaan dembiile ahay, waxaan weli ku jira noloshii Aadan, oo waan dembaabay. Waxaan rumeysannahay inaad inankaaga madiga ah soo dirtay si uu iskutallaabta ugu dhinto si aan dembiyadeyda uga badbaado. Waxaa kaloo aan rumeysannahay inuu dib u soo sara kacay oo hadda noolyahay, oo haddadan waxaan Isaga ku soo dhaweynaya ruuxeyga si uu iigu ahaado Badbaadiyey. Waan huray wax kastoo aan ahay, wax alla waxaan haysto iyo waxaan kuu ahaan doono oo dhan. Waan ka soo laabanaya dembifalkeyga oo dhan iyo isla weynideyda aan nolosheyda awooddeyda ku hogaaminayey. Waxaan jeclahay inaan nolosheyda cusub u nolaado Masiixa. Waad ku mahadsan tahay badbaadada aad I siisay. Aamiin."

Ducada aqoonsiga

Haddii aad duceysatay "ducada Badbaadada," xidhiidh cusub ayaad la leedahay Ilaah, maxaa yeelay Ilaah wuxuu sheegay inuu kuwa Masiixa rumeysan oo dhan ku deeqi doono fursadda ay carruurta Ilaah ku ahanayan sida ku dhigan Yooxanaa 1:12. Haddaba haddii aad ducada Badbaadada hadda ku duceysatay ama aad mar hore ku duceysatayba, waxaa kuu raacsan inaad ku duceysato "ducada aqoonsiga" taasi oo kugu caawineyso inaad fahantid nolosha Masiixa e ku saleysan guul iyo nabad. Intaanad arkin natiijada ducadan, waa inaad qumaati uga daashid noloshaada aad awooddaada iyo aqoontaada ku hogaamineysid; waa inaad Ruuxa Quduuska ah e Ilaah u hogaansantid si aad u gashid ku xarbiga ku noolaanshaha nolosha Masiixinimo taasi oo ay micnaheedu tahay inuu

Masiixa yahay awoodda aad ku socotid. Waa inaad diyaar u ahaatid inaad ka soo noqotid habka aad noloshaada ku hogaamineysid awooddaada iyo aqoontaada baniaadmiyeed. Haddaba haddii ay tani tahay xaaladda aad ku sugan tahay, habkan ku duceyso;

"Aabbow, waad ku mahadsan tahay sida aad dembiyadeyda iiga cafisay oo aad iiga soo bixisay noloshii Aadan oo aad iigu beertay nolosha Masiixa. Madaama aan hadda Masiixa ku jiro, waxaan aaminsanahay in Isaga iskutallaabta laygula qodbay, layla aasay, laylana sara kiciyey oo weliba waxaan Isaga la fadhiya gacanta midigta ah e Ilaaha Aabbaha qaadirka ah. Hadda wixii ka dambeyo, waxaan go'aansaday inaan Wiilkaaga – Ciise Masiix u hogaansamo, si uu noloshiisa iigu nolaado iguna adeegsado. Waxaan iisu haysta inaan dembi ka dhintay oo aan adiga kugu noolahay, waxaanna ka codsanaya Ruuxa Quduuska ah inuu I xusuusiyo mar alla markaan ilowbayo dhimashada aan Masiixa la dhintay si aan u ahaado mid ku dadaalo inuu nolosha Masiixa uu raali ka yahay ku nool anoo istecmalayo awooddeyda baniaadminimo iyo garadkeyga. Waxaan doortay inaan nafteyda oo dhan kugu adeego xaqnimada oo dhan, oo ma jirto qayb jirkeyga ka tirsan oo aan u oglaan doono in loo adeegsado dembifal. Waad ku mahadsan tahay sida aad Masiixa iyo noloshiisa iigu caddeysay. Haddaba isku sharaf nolosheyda. Magaca Ciise Masiix ayaan ku duceysanaya. Aamiin."

Waxaa qoray Charles R. Solomon, Ed.D., Waa asaasaha iyo weliba Madaxweynaha Ha'yadda la yidhaahdo Grace Fellowship International (GFI). Isagu waa ninka alifay habkan cusub e xidhiidhka Ciise lala leeyahay lagu macneynayo kaasi oo ah hab la talin oo loogu yeedhay Spirituotherapy (yacni la talinta ruuxiyanka ah ama uu saldhigeedu yahay Erayga Eebbe) oo shaqeyneysay ka bilabato sanadkii 1969. Wuxuu qoray ilaa iyo 10 buug oo ay mawduucyadooda kala yihiin: Hogaanka farxadda lagu helo, Waxyaalaha gudaha ama dibada naca lagala kulmayo, La talinta kusaleysan Maskaxda Masiixa, Hogaan lagu helo soo dhoweynta ama ogolaanshaha, Luulka iyo Erayada kala duwan, Hogaan lagu helo Farxadda e ku saleysan Aayad, Iyo Hogaan ku saabsan Farxadda iyo Adiga, Waa daaweyn ruuxiyan ah. Buugan yar e aad akhrisaneysid waa qayb la soo gaabiyey oo ku salaysan cutubka labaad e buuga la yidhaahdo Hogaanka lagu helo Farxadda. © 1996-2000 Grace Fellowship International. Qoraaladan la magac baxay Garaangarta iyo Leenka waxaad ka dalban karta Grace Fellowship International.